

# **Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore**

**2012**

**Tusmada Xeerka**

	<b>Pages</b>
Qodobka 1aad; Magaca Xeerka .....	4
Qodobka 2aad; Eray bixinta Xeerka .....	4
Qodobka 3aad; Dhawrsanaanta .....	4
Qodobka 4aad; xuquuqda hoyga .....	4
Qodobka 5aad; Gunnada maamuuska Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore..	5
Qodobka 6aad; Xilliga bilowga gunnada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore.	5
Qodobka 7aad; Reebanaanta .....	5
Qodobka 8aad; Kharashka Caafimaadka .....	6
Qodobka 9aad; Geerida Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore.....	6
Qodobka 10aad; Tirtirid .....	6
Qodobka 11aad; Dhaqan-galka.....	6

# **JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND**

## **GOLAHA WASIIRRADA JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND**

Golaha Wasiirrada

**Markuu arkay:** qodobka 74aad, xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Tixgeliyey:** Baahidda loo qabo xeer lagu maamulo xuquuqda iyo Dhawrsanaanta Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore.

Waxa uu ansixiyey Xeerka Xuquuqda Madaxwewynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka hore ee JSL.

**Qodobka 1aad**

## **Magaca Xeerka.**

Waxaa loogu yeedhaayaa Xeerkan, Xeerka Xuquuqda Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka hore.

### **Qodobka 2aad**

#### **Eray bixinta Xeerka**

Haddaanu Xeerku si kale u dhigin erayada hoos ku xusan waxaa loola Jeeda:

<b>Madaxweynaha hore:</b>	Qof kasta oo Xilka Madaxweyne ka qabtay JSL intey jirtey.
<b>Madaxweyne-ku-xigeenka hore:</b>	Qof kasta oo Xilka Madaxweyne ku Xigeenka ka soo qabtay JSL inta ay jirtey.
<b>Dhawrsanaan:</b>	waa ilaalada sharci ee Xeerku siiyey cid xadiidan isagoo eegaya Duruuf Gaar ah.
<b>Xuquuq:</b>	waxa loola jeedaa Xuquuqda Lagu mutaystay Xeerkan

### **Qodobka 3aad**

#### **Dhawrsanaanta**

Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore waxay leeyihiin dhawrsanaan sharci ee ay leeyihiin Xildhibaanada Golaha Wakiilladu, waxaana uu ku waayi karaa haddii Maxkamadi ku hesho denbi ciqaabtiisu aanay ka yarayn 3 sanadood.

### **Qodobka 4aad**

#### **Xuquuqda hoyga**

Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore waxay xaq u leeyuhiin:

1. In Dawaladdu siiso hoy ku habboon oo ah guri dawladeed oo ah (free rent) inta ay nool yihiin/Xaasaskoodu nool yihiin, ka u yar caruurtooduna ka gaadhayaan da'da qaangaadhka.
2. In dawladu u dayactirto hoyga, iyadoo la raacayo nidaamka dayactirka guryaha dawlada.
3. In la siiyo hal gaadhi

## **Qodobka 5aad**

### **Gunnada maamuuska Madaxweynaha iyo Madaxweynaha Ku-xigeenka hore**

1. Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore waxay yeelanayaan 25% mushaharka ku xusan Xeerka Mushaharka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka iyo xuquuqda ay ku helaan xubin sharafeednimada Golaha Guurtida.
2. Haddii Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore geeri ku timaado marwadiisa/marwooyinkiisa iyo caruurta waxay yeelanayaan 12.5% mushaharka ku xusan Xeerka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka.
3. Haddii Marwada/Marwooyinka Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore geeri ku timaado, waxa caruurta loo sii wadayaa 12.5% Mushaharka ku xusan Xeerka Mushaharka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka, ilaa inta ilmaha u yari ka gaadhayo da'da qaangaadhka.
4. Xuquuqda kor ku xusan waxa Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore ku waayi karaan haddii uu dalka ka qabto xil siyaasadeed (Golayaasha Qaranka, Xisbiyada Qaranka iyo Ururada Siyaasadeed).

## **Qodobka 6aad**

### **Xilliga bilowga gunnada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka hore**

1. Waxa Madaxweynaha ama Madaxweyne Ku-xigeenka hore gunnada looga Bilaabaya marka uu xilka wareejiyo
2. Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore ee intaan xeerkani dhaqangalin xilka ka degay waxa gunnada looga bilaabayaa marka xeerkani dhaqangalo, isla markaana lagu daro sanad miisaaniyadeedka ugu horeeya.

## **Qodobka 7aad**

### **Reebanaan**

Xuquuqda u xeerkani jideeyey waxa ka reeban in la siiyo Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka hore ee Xilka lagaga qaaday Maamuus ka Xayuubin Dastuuriya. ( constitutional impeachment), ama uu ku dhacay danbi maxkamadi ku xukuntay oo aan ka yarayn 5 sano isaga oo banaanka jooga.

## **Qodobka 8aad**

## **Kharashka Caafimaadka**

1. Haddii Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore ay soo food saarto xaalad Caafimaad daro oo guddida dhakhaatiirta Qaranku ku taliyaan in cusbitaal dibedeed loo diro, waxa kharashka caafimaadka bixinaya Xukuumadda.

## **Qodobka 9aad**

### **Geeridda Madaxweynaha ama Madaxweyne Ku-xigeenka hore**

Marka ay geeri ku timaado Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore, waxa loo sameynayaa Aas Qaran.

## **Qodobka 10aad**

### **Tir-Tirid**

Waxa la tir-tiraya Xeer kasta oo ka hor imanaya Xeerkani, laguna jideeyey Xuquuqda Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore.

## **Qodobka 11aad**

### **Dhaqan- Galka**

Xeerkani wuxuu dhaqan gelaya marka labada Gole ee Xeer-dejintu ansixiyaan, madaxeynuhuna saxeeexo, ee Faafinta Rasmiga ah lagu soo saaro